



## Heerarka qalinjabintu waxay sare ugu kaceen 80.5% sanad dugsiyeedkii 2018-19

Heerarka qalinjabinta Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay sare ugu kaceen 80.5% sanad dugsiyeedkii 2018-19, taasi oo gaartay kororkii boqolkiiba ee degmada ugu sarreeyey ilaa intii gobolka Oregon uu qaatay nidaamka kooxda afarta sano 2010.

Tirooyinka qalinjabinta gobolka oo dhan waxay sii daysay Khamiistii Waaxda Waxbarashada Oregon, heerka PPS-na wuxuu kordhay sanadkii 10<sup>aad</sup> oo xiriir ah. Heerku wuxuu sii waday koror cajiib ah laga soo bilaabo 2009-10, markaasi oo heerka degmadu uu ahaa 53.5%.

“Waxaan rumaysanahay in natijjooyinkan wanaagsani ay marag ka yihin dadaalka wadajira ee ardaydeena, barayaasha iyo saaxiibada bulshada,” Kormeere Guud Guadalupe Guerrero ayaa dhahay. “Waxaynu ahayn qaar ujeeddo cad ka lahaa ballanqaadkeena si aynu si wacan ugu taageerno dhammaan ardaydeena, innagoo awood si gaar ah u saarayna ardaydeena taariikh ahaan aan si buuxda loogu adeegin.”

Ardayda Afrikaan Ameerikaanka, Iska-dhalka ah iyo kuwa Laatiinooga ah dhammaantood waxay lahaayeen heerar qalinjabin oo u dhexeeya 72.3 iyo 72.6%, iyagoo wali sare u sii kacayey saddexdii sano ee ugu dambeeyey. Marka lagu daro isbaddalada kale:

- Ardayda Laatiinooga ah waxay sameeyeen koror ah 7.1 boqolkiiba.
- Ardayda Iska-dhalka ah waxay sameeyeen koror ah 5.8 boqolkiiba.
- Ardayda Afrikaan Ameerikaanka ah waxay keeneen koror ah 4.9 boqolkiiba.
- Ameerikaanka Waddanka Loogu Yimi/Reer Alaska waxay keeneen koror ah 23.7 boqolkiiba.
- Ardayda caddaanka ah waxay sameeyeen koror ah 4.6 boqolkiiba.

2010, Oregon waxay qaadatay nidaamka kooxda afarta sano kaasi oo ku xisaabtama ardaydu inay noqdaan qaar wakhtiga loogu talogalay ku qalinjabiya haddii ay ku kasbadaan dibloomo caadi ah ama la baddalay afar sano gudahood markii dugsiga sare ay galeen. PPS waxay isticmaashay dhawr barnaamij si ay u caawiso sii socoshada kororka qalinjabinta

2017-18, PPS waxa hirgalisay qorshe xeeladeed oo dugsiga sare ah kaasi oo xoogga saaraya taageeridda ardayda cusub, oo ay kujirto diirad-saaridda helitaanka dhibco, taasi oo ah aasaaska guud ahaan guusha dugsiga sare. Degmadu sidoo kale waxay ka samaysay Kooxaha Guusha Ardayga dhammaan dugsiyada sare, kuwaasi oo ka kooban saddex ilaa afar macallin iyo lataliyayaal kuwaasi oo la shaqeeya koox ardayda fasalka sagaalaad ah sanad dugsiyeedku inta uu socdo.

“Noocan taageerada ardayga ah ayaa baddashay ciyarta,” ayey dhahday Joe LaFountaine, Kormeeraha Guud ee Goboleed taasi oo kormeerta dugsiyada sare. “Waxay tusaale u tahay sida khayraadka bartilmaameedsan iyo shaqada xeeladeed ay innooga caawin karto yaraynta faraqa u dhexeeya kooxaha ardayda.”

Barnaamijyada Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada (CTE) sidoo kale waxay ka ciyaraan door muhiim ah guusha ardayga ee PPS. Xog ayaa muujinaysa in ardayda qaadata in ka badan laba koorsoo oo barnaamijka CTE ah ay heerka qalinjabinta ku badan yihiin.

“Waxaannu aad u kordhinay barnaamijka Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada waxaanannu ka sare marnay yoolalkii nooga yaallay ardayda dhammaysata laba ama ka badan oo koorsooyinka CTE ah,” ayey dhahday Dr. Russel Brown, Madaxa Hawlqabadka Nidaamka. “PPS-na waxa jira arday badan oo qaadata fasallo ah Meelaynta Sare, International Baccalaureate iyo laba luuqadood marka loo eego dugsiga kale intooda badan waddanka oo dhan.”

Heerka qalinjabinta Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay hoggaaminayeen heerka guud ee gobolka sanadkii afraad oo xiriir ah.